KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sanadka 1 Muqdisho 1 Nofembre 1973 L. 21

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 11, Tr. 14 Ottobre 1973 — *Qaanuun lagu kordhinaayo qaanuunka Shaqaalaha Dawladda.* Bog. 2

SHARCI L. 12 Tr. 14 Ottobre 1973 — *Wareejinta cashuuraadka qaarkood ee Dawladda dhexe iyo Dawladda Hoose.* » 3

SHARCI L. 13 Tr. 25 Ottobre 1973 — *Cafis Guud iyo Cafis Gaared.* » 6

## BOGGA LABAAD

W. M.

# BOOGA KOOWAAD

## SHARCI

SHARCI L. 11, Tr. 14 Ottobre 1973.
Qaanuun lagu kordhinaayo qaanuunka shaqaalaha dawladda.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGA OO ARKAY Xaanshidii 1aad iyo ta 2aad ee Kacaanka 21kii Oktober;

ISAGA OO ARKAY Sharciga Shaqaalaha Dawladda tiradiisuna tahay 29 ee 1dii Abrile 1970 iyo beddelaadii lagu sameeyay;

ISAGA OO TIXGELINAAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Qodobka 7aad xubintiisa 1aad lambarkiisa (ii) ee Sharciga Shaqaalaha Dawlaha tiradiisuna tahay 29 ee 1dii Abril 1970 iyo beddelaadii lagu sameeyay waxaa loo akhriyi doonaa sida soo socoto:

( ii) a) Shahaado Dugsiga Sare mase shahaadooyin la mid ah waxaa lagu qori doonaa derejada «B»;

b) Shahaado Dugsiga Sare oo la jiro tabar farsamo iyo shaqo aqoon ahaaneed u yaraan labo sano waxaa lagu qori doonaa derejada «B9»;

(iii) a) Shahaado Dugsiga Dhexe mase shahaadooyin la mid ah waxaa lagu qori doonaa derejada «C»;

b) Shahaado Dugsiga Dhexe oo la jiro tababar farsamo iyo aqoon gaar ahaaneed ugu yaraan labo sano waxaa lagu qori «C10».

Qodobka 2aad

Qodobka 7aad xubintiisa 2aad waxaa lagu kordhiyey wax soo socda:

Shaqaalaha Farsamada Gacanta (Technical category) ee kor lagu xusay, waxaa laga wareegin doonaa B iyo C iyagoo qaadan doona derejada ama derejooyinka cusub.

Shaqaalaha Dawladda ee Farsamada Gacanta shahaadana aan haysan ee kor lagu tilmaamay waxaa loo kale qaybiyey afar drajadood kuwaas oo ah 1, 2, 3 iyo 4.

Mishahaaradooda iyo habka shaqaalaha farsamada gacanta lagu wareejin doono waxaa lagu caddeyn doonaa Xeer Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka, isaga oo qaadan doona talo uu soo jeedin doonaan Xafiiska Shaqaalaha Dawladda ee lagu xusay Qodobka 10aad qaanuunka tiradiisu tahay 29 ee 1dii Abril 1970.

Qodobka 3aad

Guddiga kor lagu soo sheegay (Commissione Giudicatrice) oo lagu daray dad aqoon sare u leh Farsamada Gacanta (Technical know-how), waxaa lagu gamacaabi doonaa xeer uu soo saari doona Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka isaga oo tix gelin doona taolo uu soo jeediyo Agaasimaha Guud ee Shaqaalaha Dawladda.

Qodobka 4aad

Guddigu (Commissione Giudicatrice) ee Qodobka 3aad lagu tilmaamay waxay talo ka bixin doonaan arrimaha soo socda:

b) Qaddiraadka mishaaharka Shaqaalaha Farsamada Gacanta oo loo kala qeybiyey afar derajadood;

t) in ay tilmaan cad ka bixiyaan Shaqaalaha Farsamada Gacanta kuwa loola geedo (Descrizione delle varie Categorie) oo qaanuunkan lagu dhaqi doono;

j) waxii arrimo ku sqbsan shaqaalaha Farsamada Gacanta oo ah wareejntooda, habka imtixaankooda iwm.

Qodobka 5aad

Guddigaas kor lagu magacaabay waxaa loo xil saaray in imtixaan ay ka qaadaan Shaqaalaha Farsamada Gacanta ee Dawladda u shaqeeya, waxaana awood loo siiyey in shahaado aqoonsi ah in ay siiyaan shaqaalaha ka qayb gala si loo ogaado qof walba aqoontiisa heerka ay joogto.

Guddiga waxaa awood loo siiyey iney magacaabaan Guddi Teknika ah ee imtixaanka ka qaada Shaqaalaha Farsamada Gacanta ee Gobollada.

Qodobka 6aad

Sharciga wuxuu nasakhayaa wixii sharci hore istaagi kara ama aan la socon karin.

Sharcigani wuxuu dhaqan geli doona maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 14 Oktober 1973.

*Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

SHARCI L. 12 Tr. 14 OOttobre 1973.
Wareejinta cashuuraadka Qaarkood ee Dawladda Dhexe iyo Dawladda Hoose.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO TIXGELINAAYA Go' aankii labada Gole: Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU DHAOAN GELINAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo taariikhda 1-1-74 cashuuraadka hoos ku qoran waxa laga wareejiyey Dawladda Dhexe loona wareejiyey Dawladda Hoose:

1. Cashuurta dakhliga ee guryaha ku dhigana Qodobka 12aad xaraf e) sharciga Lambarkiisu yahay 5 taariikhdiisuna 5-11-1966 iyo Sharciga lambarkiisu yahay 6 taariikhdiisuna 28-12-1971;

2. Cashuur dheeraadka shutuudka ah ee ku qoran Madaxa 9aad ee Sharciga lambarkiisu yahay 5 taarikhdiisuna 5-11-1966 iyo sharciga beddela lambar 1 taarikhdiisuna 5-4-1967;

3. Cashuurta madadaalada ee ku qoran sharciga lambarkiisu yahay 23 taarikhdiisuna 21-12-1965;

Qodobka 2aad

Isla wakhtigaas cashuur dheeraatka Dawladaha Hoose ee ku qoran Qodobka 39aad Sharciga lambrkiisu yahay 5 taarikhdiisuna 5-11-1966. waxaa lagu dari Cashuurta Dawladda Dhexe.

Qodobka 3aad

Cashuur dheeraadka Dawladaha Hoose ee ku qoran Qodobka 1aad hakad 2 ee Sharciga lambarkiisu yahay 6 taarikhdiisuna 28-12-1971, waxay u hareysaa Dawladaha Hoose.

Qodobka 4aad

Habka lagu baaro iyo habka lagu guro cashuuraadka aan Qodobadii hore ku tilmaaney waxay ahaanayaan sidoodii.

Qodobka 5aad

Cashuuraadkii la hubiyey oo aan la qaban sida Qodobka 1aad uu qoraayo, waxa ay u go'aayaan Dawladda Dhexe, ka bilaabato waqtiga hirgelinta Sharcigan, isla markaasna cashuur dheeraadka ku qoran Qodobka 2aad waxa ay u go'aayaan Dawladda Hoose.

Qodobka 6aad

Sharcigan hirgelintiisu waxay kaga bilaabaneysaa 1-1-1974 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Mugdisho, 14 Oktobar 1973.

*Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

**SHARCI L. 13 Tr. 25 Ottobre 1973.**
**Cafis Guud iyo Cafis Gaareed.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka;
ISAGOO ARKAY Sharciga soo baxay 21kii Owtoobar 1969kii;
ISAGOO GARTAY In la bixiyo Cafis-Guud ee loogu daryeelayo Xuska Sannad-Guuradda 4aad ee Kacaankii barakeysnaa ee 21kii Oktoobar 1969kii iyo Xuska Ciid «El Fidri» 1393;
ISAGOO TIXGELIYEY Go'aankii ay isku raaceen G.S.K. iyo Golaha Xoghayayaasha.

WUXUU XEERIYEY

Sharciga soo socda:

Qodobka 1

Waxaa la bixiyey Cafis-Guud (amnistia) oo ku saabsan Dambiyada oo ay Ciqaabteedu gaarayso ilaa 7 (toddoba) sannadood oo Xarig ah ama ilaa 10.000 (tobankun) shilin oo Ganaax ah ama labadoo wada jira, iyadoo aan la tixgelinin kordhinta iyo dhimadda Ciqaabta la xiriirta (circostanza aggravante ed attenuante).

Qodobka 2

Waxaa la bixiyey Cafis-Gaareed (indulto) oo ku saabsan Dambiyada Ciqaabta Xarigga ah iyo Ciqaabta Lacagta ah, waxayna tahay:

1. in 7 (toddoba) sano laga dhimo wixii Ciqaab Xarig ah oo ka badan tiradaas;
2. in 10.000 (tobankun) shilin laga dhimo wixii Ciqaab-lacageed ah oo ka badan intaas;
3. kuma jiraan Cafiskaas, Dambiyada Lacagta ah (reati finanziari).

Qodobka 3

Cafiska-Guud (amnistia) iyo Cafiska-Gaareed (indulto) oo lagu xusay Qodobbada kore, waxay ku saabsan yihiin Dambiyada la galay iyo Ciqaabta sugnaatay intii ka horeesay 21kii Oktoobar 1973ii, saacaddu markay ahayd 3dii Aroornnimo.

Qodobka 4

Cafiska-Guud (aministia) iyo Cafiska-Gareed (indulto) oo la bixiyey, kuma jiraan:

(b) Dambiyada laga galay Dawladda oo halis galinaysa Nabad-Galyada Qaranka Somaliyeed (delitti contro la Sicurezza, l'integrità e l'unità della Nazione Somala), Maamulka Dawladda (delitto contro la Pubblica Amministrazione), dhaqaalaha Dawladda (delitti contro l'economia Pubblica), oo lagu xusay Sharciga lambarkiisu yahay 54 oo soo baxay 10kii Sebtembar 1970kii, Qodobka 1aad ilaa 22aad iyo kuwa lagu xusay Buugga 2aad qaybtiisa 1aad, qodobka 184 ilaa 239 Buugga Xeerka Ciqaabaatka Soomaaliyeed oo aan lagu sheegin Sharciga lambarkiisu yahay 54 ee 10-9-1970.

(t) Dambiyada lagu xusay Qodobbada 241, 242, 243, 244, 245, 246, 247, 249, 250 iyo 251 ee Buugga Xeerka Ciqaabta Soomaliyeed.

(j) Dambiyada lagu xusay Sharciga lambarkiisu yahay 67, oo soo baxay bisha Nofembar 4eeda 1970, qodobbadiisa ah 1, 2, 3, 4, 5, 6, 7, 8, 10 iyo (qaybyaaladda iyo dilka kaska ah).

(x) Dambiyada lagu xusay Buugga 2aad qaybtiisa 7aad Juska 3aad qodobbadiisa ah 366, 367, 368, 369, 370 iyo 371 ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed kuna saabsan Beenta qoraallada (falsità in atti) iyo 434 X. C.

(kh) Dambiyada lagu xusay Buugga 2aad qaybtiisa 1aad iyo tan 2aad Juska 1aad, kan 2aad iyo kan 3aad qodobbadiisa ah, 64, 65, 66, 67, 68, 69, 70, 71, 72, 73, 74, 75, 76, 77, 78, 79, 80, 81, 82, 83, 85, bis, 87 iyo kuwa lagu xusay qaybtaa 3aad Juska 2aad qodobbadiisa ah 158, 159, 162, 163 iyo qaybta 4aad Juska 1aad qodobbadiisa ah 186, 187, 188, 189 iyo 195 bis ee Xeerka Ciqaabta Militeriga Nabadda.

## Qodobka 5

Sharcigani wuxuu dhaqan galaayaa 21ka Oktoobar 1973 waxaana lagu faafinaayaa Xaashida Rasmiga ah (B.U.) ee Jamhuuriadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed.

Muqdisho, 25-10-1973.

*Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

## BOOGA LABAAD
## XEER DOWLADEED

W. M.

---

## BOOGA SEDEEXAAD
### TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

W. M.

---